

# WAKHTIGA KA HOR DUGSIGA XANAANADA CARRUURTA



## U Diyaargarowga Maalinta Koowaad

Dugsiga xanaanada carruurta ayaa dib loo furayaa! Waa kuwan waxyaabo qoyskaagu samayn karo si ay ugu diyaar garoobaan maalinta koowaad ee dugsiga. Dugsiyadu wey kala duwan yihiin, markaa ka hubi dugsigaaga shuruudaha gaarka ah ee loo baahan yahay inaad buuxiso.

### Soo iibsashada Agabka

- Qalabka dugsiga
- Dharka ama lebbiska
- Boorsooyinka dhabarka
- Weelashada qadada (haddii loo baahdo)

### Dejinta Jadwal

- Wakhtiga hurdada
- Wakhtiga soo toosida
- Caadada subaxda
- Aaditaanka dugsiga
- Qorshayaasha dugsiga kadib

### Ogaanshaha Baahida Gaadiidka iyo Xanaanada Carruurta

- Bas, raacida baabuurka, ama socodka?
- Gaadiidkii subaxdii iyo galabtii ma isku mid baa?
- Xanaanada carruurta ee ka hor ama ka dib dugsiga?

### Macsalaameynta

- Ka hadal hawlaha xagaaga ee dhammaanaya.
- Qorshee oo adeegso hab-dhaqanka macsalaamaynta ilmahaaga.
- Adeegso dhaqanka ah inaad adiga iyo ilmahaaga aad kala fogaatin.

### La xiriirada Shaqaalaha Dugsiga

- Buuxi dhammaan foomamka.
- Ka qaybgal xafladaha dib ugu noqoshada dugsiga.
- Isku diiwangeli barnaamijyada isgaarsiinta dugsiga.
- La soco cinwaanada baraha bulshada ee dugsiga.
- La xiriir macalinka ilmahaaga.
- Weydii su'aalo.

Ku laabashada dugsiga waxay noqon kartaa wakhti xiiso leh laakiin sidoo kale adag. Hoos waxaa ku qoran liiska agabyada laga yaabo inay ka caawiyaan qorshaha ilmahaaga ee maalinta koowaad ee uu ku laabanaayo dugsiga xanaanada ee carruurta:

- Raadso hadiyadaha laga qeybiyo kaniisadaha iyo xarumaha bulshada.
- [Xarunta Agabka Qoyska \(FRC\)](#) ee dugsigaaga ayaa kugu xiri karta agabka sida dharka iyo [baarista](#)
- [Caafimaadka](#) baahan tahay in lagaa caawiyo [foomamka](#), ka wac Xarunta Wicitaanada ee JCPS 502-313-4357 si aad caawimo u codsato. Haddii aad u baahan tahay turjubaan, isticmaal [kaararka waan hadla](#) ee JCPS si aad caawimaad ugu hesho luqadaada asalka ah.
- Qoyskaagu waxa laga yaabaa inay dugsiga ka helaan [cunto bilaash ah ama qiimo jaban](#). Buuxi foomka cuntada ee dugsigaaga.
- Maalinta ugu horreysa ee marka lagu laabto dugsiga xanaanada waxay noqon kartaa mid madadaalo iyo xiiso leh. Waxa kale oo ay noqon kartaa mid adag ama daal badan. Ka hor intaanu dugsigu bilaabmin, qoyskaagu waxa ay la tacaali karaan dareenkan iyaga oo samaynaya hab-dhaqanka maalinlaha ah, iney hurdan, iyo iney wakhti isla qaatan.
- Bilowga dugsigu waa mid qoysasku ay ku kala duwan yihiin. Waa muhiim inaad la xiriirto macalinka ilmahaaga goor hore iyo marar badan. Tus shaqaalaha dugsiga, ilmahaaga, iyo naftaada jacayl inta lagu jiro wakhtigan.
- Waxaa jira [agab dheeraad ah](#) oo loogu talagalay qoysaska u baahan taageerada dhaqanka carruurta, qaba walac dhanka korriinka, iyo caafimaadka dhimirka.